

Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Ogoosto 23, 2021

Ku socota: Hay'adaha Maamulka Kiiska iyo Daryeel Bixiyayaasha ODDS  
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Isbeddelada siyaasadaha COVID-19

Kiisaska COVID-19 oo ay sii socoto in ay xawli ah ugu sii kordhayaan gobolka oo dhan iyo nidaamka naafanimada korriinka dhexdiisa. Si loo ilaaliyo caafimaadka iyo badbaadada, ODDS waxay soo celinaysaa qaar ka mid ah siyaasadihii hore ee COVID-19. **Isbeddelada siyaasadahani waxay dhaqan galayaan Arbacada, Ogoosto 25, 2021.** Isbeddelada waxaa ka mid ah:

- Maaskaraha oo looga baahan yahay dhammaan daryeel bixiyayaasha naafanimada korriinka, marka laga reebo daryeel bixiyayaasha la nool qof la taageero. Siyaasadani waxaa ka mid ah shaqaalaha daryeelka shakhsiyeed iyo daryeel bixiyayaasha madaxa bannaan sida dadka khibrada u leh hab-dhaqanka. Intaasi waxaa dheer, in dhammaan daryeel bixiyayaasha iyo adeegyada taageerada hawlaha maalintii (DSA) oo ay ku jiraan adeegyada fool ka foolka ah sida tababarka shaqo, looga baahan yahay in ay xirtaan maaskaro marka ay bixinayaan taageero.
- Booqashooyinka maamulka kiiska ee shakhsi ahaaneed ayaa la joojiyay haddii uusan jirin walwal caafimaad iyo badbaado la xiriiraa. Booqashooyinka xaqiijinta tayada ee shakhsi ahaaneed sidoo kale waa la joojiyay.
- Kooxda DSA iyo adeegyada dariiqa shaqada ee aan muhiimka ahayn (sida fasallada) waxay kaliya dhici karaan haddii boqolkiiba 80

shaqaalaha la tallaalay. Wax aan ka badnayd lix qof (oo ay ku jiraan shaqaaluhu) ayaa la oggol yahay koox ahaan.

Daryeel bixiyayaasha ODDS iyo hay'adaha maamulka kiiska waa in ay sidoo kale tixraacaan [Buug yaraha Maamulka Caafimaadka Oregon/ODDS ee loogu talagalay Borotokoolka Ku soo jawaabista Waqtigii la rabay ee dilaaca COVID-19 ee Goob La degan yahay oo ah Naafanimada Korriinka](#). Buug-yaraha ayaa tilmaamaya dadaalada wax isku duwida iyo jawaab bixinta ee ODDS iyo Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) marka saddex ama ka badan oo ah kiisaska COVID-19 ay xiriir la leeyihiin goob la degan yahay oo ah naafanimada korriinka[3].

Macluumaadka iyo ilaha siyaasada ee COVID-19, oo ay ku jiraan tilmaamaha dhammaan shaqaalaha COVID oo dhan, ayaa laga helayaa internet-ka: <https://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/ODDS-COVID-19-Information.aspx>

Waan uga mahad celinaynaa wax kasta oo dadka qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka, xubnaha ka tirsan qoysku, daryeel bixiyayaasha iyo maamulayaasha kiisku ay sameynayaan si ay taageeraan caafimaadka iyo badbaadada.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa*  
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).